



## MAANIFESTADA “GIRONA” EE XUQUUQDA AFAKA

PENka Caalamigu waa urur kulmiya qoreyaasha adduunka. Maanifestadan, oo Guddiga Xuquuqda Afafka iyo Tarjumaada ee PENka Caalmigu ku dejiyay “Girona” (May 2011kii), waxa lagu ansixiyay Shirweynihii 77aad (Sebtamber 2011kii) ee PENka Caalamiga. Maanifestadani waxay caddaynaysaa tobanka mabda’ ee xuddunta u ah, haga na xuquuqda afafka :

1. Kala-duwanaanta afafku waa dhaxal caalami ah oo mudan in la qiimeeyo, la na ilaaliyo.
2. Qadarinta dhammaan afafka iyo dhaqannadu waxay sal u tahay geedi-socodka lagu abuurayo lagu na waarinayo wada-hadalka iyo nabadda ummadaha.
3. Qof kasti waxa uu ku dhex afbartaa bulshada ugu deeqda nololsha, afka, dhaqanka iyo haybta.
4. Afafka kala duwan iyo siyawga kala duwan ee loo hadla, ma aha oo keliya qaab la iskula xidhiidho ; waxa kale oo ay yihiin deegaannada uu aadamuhu ku barbaaro, dhaqannadu na ka soo unkamaan.
5. qoomiyad kaste waxay xaq u leedahay in ay afkeeda ka dhigto afka rasmiga ah ee dhulkeeda laga adeegsado.
6. Wax-barashada iskuulladu waa in ay qayb ka qaadato kor u qaadidda sharafta afka ay ku hadasho qoomiyadda dhulku.
7. Wuxuu habboon in ay dadku afaf badan aqoon guud u yeeshaan, waayo taasi waxay wax ka taraysaa is-fahamka iyo furfurnaanta aragtida, aqoon qoto dheer na waxay u yeelanayaan afkooda gaarka ah.
8. Tarjumaadda qoraalladu, siiba ta buugaagta dhaxalgalka ah ee dhaqannada kala duwan, waxay qayb mahuraan ah ka tahay geedi-socodka is-fahanka iyo is-tixgelinta ka dhexeeya aadamaha.
9. Warbaahintu waa habka ugu habboon ee lagu tebin karo qimaha kala-duwanaanta afafka, si xooggan oo hawl Karnimo leh na loogu kobcin karo kor haybaddeeda.
10. Qaramada Midoobay waa in ay aqoonsataa xaqa ay cid waliba u leedahay adeegisa iyo ilaalinta afkeeda, taasi na ka mid tahay xuquuqda asaasiga ee aadamaha.

[www.pen-international.org](http://www.pen-international.org)